

Aqoonyahannadu maxay ka yidhaaheen buuggan?

Several distinguished scholars both Somalis and non-Somalis could not help in expressing their views about this book. Among them is Prof. Mohamed Nuh Ali who lectures African History at Carleton University, Dr. Georgi Kapchits who lectures Somali language and literature at Moscow University, Jamal A. Gabobe who is a Phd Candidate in Comparative literature at University of Washington in Seattle and Hassan Abdi Madar a distinguished author and the director of the Somaliland Presidency to mention some. So the following are excerpts from their lengthy notes:

The Somali folklore masterpiece “A Soothsayer Tested” (“Faaliyihii la bilkeyday”) reveals how the structure of the world determines human behavior. The revelation is put into a magic serpent's mouth: “World there is, but life is not distinct from it. Your life, as you call it, goes as the world goes, for God made the world with many patterns and it is these that rule men’s lives... Each time it was the pattern, not yourself, that forced you to do whatever you did”.

The pattern of the 21st century is destruction and demytho-logization. It forces historians and literary scholars to subvert all previously indisputable authorities and most hallowed myths. Therefore, the publication of “**Sooyaal: Ina Cabdalla Xasan ma Sheekh buu ahaa mise ...?**” (“ *Sooyaal: Was Ina Cabdalla Xasan a Sheikh or a ...?*”) by **Cabdiraxmaan C. Faarax ‘Barwaaqo’**, in which the great Somali poet, preacher and warrior is desacralized, is no accident. This book contrasts in many ways with what has been written about him so far. It adduces indisputable evidences of the protagonist’s difficult nature and shady deeds.

Dr. Georgi Kapchits

Moscow University, Moscow, Russia

Qoraalkani wuxu isku taxallujinayaa inuu si cilmi ah u eego dhacdooyinkii taariikhiga ahaa ee la xidhiidhay aragtiyihii wejiyada diiniga ah ee kala duwan lahaa iyo Istimarkii.

Inta badan qoraallada ilaa hadda jiraa waxay xoogga saareen Maxamed Cabdalla Xasan, iyaga oo si qoto dheer uga hadlaya aqoonta uu u lahaa diinta iyo sidii firfircoonayd ee uu uga hor yimid dalalkii dhulka Soomaaliyeed qaybsaday.

Wuxu qorahani ku dadaalayaa inuu eego xaaladdii dhabta ahayd ee markaa ka jirtay Berbera qarnigii 19aad markii uu Istimarku qabsaday dalka Soomaaliyeed isaga oo adeeg-sanaya macluumaad aan hore loo adeegsan.

Borof. Maxamed Nuux Cali

(History department ,Carleton University, Ottawa, Canada)

Lama qori karo taariikh qof, tu halgan, tu qaran, iyo tu waayo nololeed toona haddii aan si mug leh loo eegin dhinacyadeeda, ta togan iyo ta tabanba, oo aan la soo tebin macaankeeda iyo qadhaadhkeedaba iyadoo tixgelin la siinayo qaybaha ay taabanayso oo idil. Cid kasta oo aan sidaa yeelin oo isku dayda inay dhinaca togan oo keliya soo gudbisaa, ama mahadhada waddadeeda ka leexisaa, waxa hubaal ah in maalin maalmaha ka mid ah runtu ka hor iman doonto oo jidku ka soo xidhmi doono. Qof kasta oo akhriyey labada buug ee *Diiwaanka Gabayada Sayid Maxamed Cabdalla Xasan* iyo *Taariikhdii Daraawiishta iyo Sayid Maxamed Cabdalla Xasan* ee uu qoray Aw Jaamac Cumar Ciise wuxu ka dhigan yahay qof bog dhaaf u akhriyey mahadho culayskeeda leh. Taas oo ah soo tebinta hal dhinac oo si wanaagsan loo subkay iyada oo uu maqan yahay dhinacii kale ee dhammaystirka u noqon lahaa si loo helo taariikh

sugan oo u cuntanta dhinacyadii halgankaas iskaga soo horjeeday.

Cabdiraxmaan C. Faarax 'Barwaaqo' wuxu ku guulaystay inuu si buuxda u soo bandhigo dhinacii kale ee taariikhdaas. Taasi waxay innoo faa'iidaynaysaa inaynu helno taariikhdii oo dhammaystiran oo dabeeto iskeen u go'aansanno inaynu ogaanno shakhsiyadda dhabta ah ee Ina Cabdalla Xasan. Ta uu qoruhu in badan oo qorayaasha Soomaalida ah dheer-yahay waa isaga oo aan aragtidiisa qofeed ku go'aan qaadan balse qoraalkiisu uu salka ku hayo cilmi baadhis qoto dheer, raadraac buuxa iyo xigasho sugan oo meel loogu hagaago xaqiijinteeda leh.

Buuggan la magac baxay ' *Sooyaal: Ina Cabdalla Xasan ma sheekh buu ahaa mise ...?* ' marka aynu la akhrinno kuwii Aw Jaamac Cumar Ciise waxaynu helaynaa qofnimadii dhabta ahayd ee Maxamed Cabdalla Xasan. Qoruhu innama siinayo jawaab ku salaysan aragtidiisa. Wuxu innoo soo bandhigayaa cilmi baadhistiisa, go'aankana innaga ayuu innoo dhaafayaa.

Runtii, waa habqoraal cusub oo ku salaysan agab ka mid ah agab hummaageedyada suugaanta Soomaalida, kaasi oo ah ka loo yaqaan Kibaaxda. Waa ' *agabka sara een saafin* '. Cabdiraxmaan wuu innoo sarayaa. Saafidda iyo go'aan qaadashadana akhristaha ayuu u dhaafayaa.

Guntii iyo gebebadii, waa buug ay tahay inuu akhriyo qof kasta oo doonaya inuu si miisaaman u **fahmo**, oo dhinaca maqan ka eego, mahadhada Sayid Maxamed Cabdalla Xasan iyo waayihii noloshiisa.

*Xasan Cabdi Madar,
aqoonyahan, qoraa, iyo
hal-abuur, Hargeysa, S/land*

The earliest writings on Muhammad Abdille Hasan were by British colonial officials. Most of these accounts were scathingly critical of Muhammad Abdille Hasan as a man and a leader. At a loss to explain why some Somalis would follow such a cruel and depraved character, British administrators came up with the idea that although Muhammad Abdille Hasan was a cut-throat and a scoundrel, his behavior was consistent with Somali notions of leadership and bravery which accepted extreme cruelty and tyranny from Somali leaders and warriors. Douglas Jardine, the British Secretary of the colonial Somaliland administration and the author of *The Mad Mullah of Somaliland* went even a step further and predicted that with the passage of time, the real blood-soaked history of Muhammad Abdille Hasan would be swept under the carpet and his image will metamorphose into that of a national hero. Jardine's prediction was presciently accurate. It was also more than just a prediction, for it was the first time that the idea of Muhammad Abdille Hasan as a nationalist was articulated. Somalia's military regime and some Somali clan-biased revisionist historians would seize on Jardine's idea, the idea of Muhammad Abdille Hasan as a Somali "national hero" and would fashion it as a weapon for their own political and clan purposes. Barwaaqo's book dismantles this myth, the myth of Muhammad Abdille Hasan as a national hero. Far from being a hero, Barwaaqo sees him as a villain. Read this book to find out why.

*Jamal A. Gabobe,
Ph.D Candidate, University of
Washington, Seattle, USA.*

Dhiganahan la magac baxay **"Sooyaal: Ina Cabdalla Xasan Ma sheekh Buu ahaa Mise.....?"** waxa uu i baray taariikh badan oo iga qarsooneyd. Muddo

badan oo aan arday soo ahaa wixii la ii soo dhigi jirey iyo waxa uu buuggani soo gudbinayaa waa kaaf iyo kala dheeri. Aragtidii aan ka qabey Ina Cabdalla Xasan iyo ta uu buuggani i soo hor dhigeyna waa tu igu reebtay yaab iyo amakaag. Waxa aan maqli jirey suugaan iyo qoraallo lagu amaanayo oo keliya, waxase uu buuggani badadda keeney oo uu caddaynayaa in taariikhda Ina Cabdalla Xasan ahayd mid dhinac ka rarnaan jirtey. Runtii, waan maqli jirey dad badan oo dhaliisha Ina Cabdalla Xasan sheega, waxanse u arki jirey iska hadal, hayeeshee qoraallada buuggan ku qorani waa sooyaal sugan oo aan cidina si kale u maan guurin Karin. Sidaa darteed buuggu wuxu tilmaamayaa dhaliilihii iyo shakhsi-yaddii dhabta ahayd ee ninkaasi.

Dhawr qodob oo i xiiso geliyey, aadna aan ula dhacay, oo aan kula kulmay dhiganahan, baa in la xuso mudan. Waana kuwa igu dhalliyeen inuu buuggani si aad ah iis oo jiito. Waxaanay kala yihiin: **Kow** sida uu u qoran yahay, oo ah hab cilmi baadhiseed, oo bog iyo sadar walba uu leeyahay sumad iyo sawrac raadraaceed, oo sugan. **Laba** sida qoruhu iskaga ilaaliyey deel qaaf, xanaf iyo xajiin uu qoraalkiisu yeesho, isaga oo bud dhig uga dhigey dhacdo walba inaanu isagu odhan ee uu inna hor keenayo cidda iyo wakhtiga la yidhi, ka dibna uu jawaabta u dhaafayo akhristaha. **Saddex** sida qoruhu aanu go'aan shakhsiyah ah aanu uga gaadhin si aanu ugu muuqan inuu dhinac u xaglinaayo ee uu inna hor keeney run cad oo meel laga dhaafaa aanay jirin.

Qoraha buuggan **Cabdiraxmaan Cabdillaahi Faarax "Barwaaqo"** oo aan aqoon fiican u leeyahay, waa qoraha keliya ee qori lahaa taariikh sidaa u sugan. Waxaanu buugganni i baray casharro badan oo aanan dugsiyadii ku soo dhigan, iyada oo aan ka faa'iidey wax mug iyo miisaan weyn leh. Sidaa oo kale waxa aan hubaa in akhriste waliba doodda iyo cilmiga buuggan ku qoran ka faa'iideysan doono, taariikhdii ummaddani soo martey ee la

majaraha-baabiyey aanay sida loo sheegey aheyn ee ay tahay sida dhabta ah
ee buuggan ku qoran

*Khaalid Jaamac Qodax,
qoraa, Hargeysa / Somaliland*